

Benzene iyo soo gelista Uumiga

Benzene waa qayb ka mid ah batroolka, inta badan benzene-ka loo isticmaalo hababka warshadaha/wax soo saarka maanta ayaa waxay ka timaaddaa saliidda cayriin oo la safeeyey. Benzene waxay dhex dhexaad u tahay soo saarista balaastiigyo kala duwan, resin-ka iyo dunta asalka (synthetic) waxaana loo isticmaalaa soo saarista noocyo gooni ah oo rabadhka ah, saliidaha, xabagta, koollada alaabta guriga, daawooyinka, iyo sunta cayayaanka.

Benzene:

- waa dareere si aad u fudud u guban kara heerkulka guriga, si fududna hawada u raaca
- waxaa caadi ahaan laga helaa hawada bannaanka iyo gudahaba
- ma leh ur marka ay tahay heerar hooseeya; waa la urin karaa (ur macaan, oo shidaal oo kale ah) marka ay tahay qiyaastii 190,000 micrograms halkii mitir kuyuubik ($\mu\text{g}/\text{m}^3$)

Dadku waxay ka neefsan karaan benzene:

- Ka shaqaynta shaqo warshadeed/wax soo saarka ee adeegsata ama soo saarta benzene.
- Hawada bannaanka, oo ay ku jirto heerar hoose oo benzene ah oo ka yimaada qiiqa baabuurta, saldhigyada shidaalka, qiiqa warshadaha, dabka kaymaha, iyo qiiqa tubaakada.
- Hawada gudaha guryaha, oo inta badan ay ku jirto heerar sare oo benzene ah marka loo eego hawada bannaanka ee ka timaadda alaabta sida xabagta, rinjiga, koollada alaabta guriga, saabuunta, isticmaalka gaaska dabiiciga ah iyo shooladaha propane, iyo qiiqa tubaakada.
- Uumiga ka yimaadda ciidda wasakhaysan ama biyaha dhulka hoostiisa mara ee soo gala hawada gudaha.

Walaac caafimaad oo ka yimaada ku neefsashada benzene

Soo gaarista ugu badan ee benzene ee ku timaada soo gelitaanka uumigu waa xaddi yar oo kuwaas oo ayna u badnayn inay keenaan saamayn caafimaad. Suurtagalnimada ah in ay saamayso caafimaadku waxay ku xirantahay qadarka benzene ee hawada ku jira iyo inta ay dhantahay muddada dadku neefsanayaan. Marka benzene uu soo galo jirka, qiyaastii kala bar ayaa uga baxa neefsashada. Inta badan ee qaybta kale ee benzene ee la neefsado ayaa loo soo nuugaa oo loo qaybiyaa jirka oo dhan iyada oo sii maraysa dhiigga oo si dhakhso ah jirka ugaga baxda kaadida.

Daraasadaha lagu sameeyey dadka iyo xayawaanka ayaa muujinaysa in ku neefsashada benzene ay sababi karto hoos u dhaca tirada unugyada dhiigga (unugyada dhiigga cad, unugyada dhiigga cas, ama platelets) iyo in ay khalkhal ku abuurta dhuuxa lafta. Soo gaarista benzene ee muddo dheer ayaa waxay kordhin kartaa halista qaar ka mid ah noocyada kansarka dhiigga qaarkood. Daraasadaha shaqada ee bini-aadamka ee muddada-dheer ayaa waxay muujiyeen caddayn ku filan oo ku saabsan xiriirka ka dhexeeya soo gaarista benzene iyo kansarka dhuuxa (leukemia), gaar ahaan myeloid leukemia/kansarka kansarka dhuuxa ee non-lymphocytic leukemia.

Qaddarka Baarista ee Soo Galitaanka Benzene

Qaddrada/Xaddiga Baarista Soo Galitaanka (ISVs) ayaa loo sameeyay si loo muujiyo goorta tallaabo loo baahan karo si caafimaadka looga ilaaliyo soo gelitaanka uumiga. ISVs waa qadar badbaado u ah dadka in ay ku neefsadaan. Heerkani wuxuu difaac u yahay dadka u nugul, oo ay ku jiraan carruurta, haweenka uurka leh iyo dadka hore u lahaa xaalado caafimaad. ISVs ayaa waxay si aad uga hooseeyaan heerarka la filayo inay keenaan saamayn caafimaad. Marka ISVs la dhaafo, MDH waxay ku talinaysaa in la qaado tallaabooyin lagu dhimayo soo gaarista.

Waaxda Caafimaadka ee Minnesota
 Qaybta Qiimaynta iyo Latashiga goobta
 Taleefan: 651-201-4897; Email: health.hazard@state.mn.us
 Si aad macluumaadkan ugu hesho qaab kale, soo wac 651-201-4897.

Xaddiga	Qeexitaanka
1.3 µg/m ³	ISV Guryaha degaanka ah - heer badbaado leh oo dadka oo dhan ka ilaaliya in ay ku keento saamayn caafimaad.
43 µg/m ³	Qaddarka uumiga ciidda ee ku hoos jira sagxada hoosteeda ee Dhismayaasha Degaanka (33X ISV) - heer badbaado leh oo ah uumiga ciidda ka hooseeya ee guryaha
11 µg/m ³	ISV Goobta shaqada - heer badbaado u leh dadka laga yaabo inay kula kulmaan meelaha shaqada sannado badan.
370 µg/m ³	Qaddarka uumiga ciidda ee ku hoos jira sagxada hoosteeda ee Dhismayaasha Ganacsiga/Warshadaha (33X ISV) - heer badbaado leh oo ah uumiga ciidda ka hooseeya ee goobta shaqada

(lagu cabbiray microgram halkii mitir kuyuubik, ama µg/m³)